DOWLADDA PUNTLAND
EE SOOMAALIYA
XAFIISKA
GARYAQAANKA GUUD

ولاية بونت لاند
الصومالية
مكتب
المحامي العام للدولة

# PUNTLAND STATE OF SOMALIA
# OFFICE OF THE SOLICITOR GENERAL


| SANADKA 23AAD | CADADKA 8AAD | TAARIIKH: 15/08/23 | Lam. 07 |
|---|---|---|---|


## FAAFINTA RASMIGA AH

## OFFICIAL GAZETTE

## الجريدة الرسمية

**Sharciga Wax-ka-bedelka Dhismaha Bankiga Dowladda Puntland**


| TUSMADA | |
|---|---|
| Qeybta 1aad | *Xeerarka Baarlamaanka iyo Heshiisyada Caalamiga ah* **Sharciga Wax-ka-bedelka Dhismaha Bankiga Dowladda Puntland** |
| Qeybta 2aad | *Xeerarka iyo Digreetooyinka Madaxweynaha.* WAXBA MALEH |
| Qeybta 3aad | *Xeer Nidaamiyeyaasha Wasaaradaha, Xeerarka Goleyaasha Deegaanka iyo Barnaamijyada Dowladda.* WAXBA MALEH |
| Qeybta 4aad | Go'aanmada Maamulada iyo Qaraarada Maxkamadaha. WAXBA MALEH |
| Qeybta 5aad | Amarada, Ogeysiisyada iyo Qandaraasyada Dowladda. WAXBA MALEH |


GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND STATE GENERAL SOLICITOR

**DOWLADDA PUNTLAND**
**EE SOOMAALIYA**

**XAFIISKA**
**MADAXWEYNAHA**

**ولاية بونت لاند**
**الصومالية**

**مكتـب**
**الـرئيـس**

**PUNTLAND STATE OF SOMALIA**
**OFFICE OF THE PRESIDENT**

**Sharci Lr. 07 ee 15-ka Agoosto 2023, kuna saabsan Sharciga Wax-ka-bedelka Dhismaha Bankiga Dowladda Puntland.**

**Madaxweynaha Dowladda Puntland**

**Markuu arkay:** Dastuurka Dowladda Puntland Qodobkiisa 80-aad farqadiisa 16-aad.

**Markuu arkay:** Ansixinta Golaha Wakiilada Dowladda Puntland ee Summadeedu tahay XGGW/DPL/50/2023, kuna taariikhaysan 10-ka Agoosto 2023.

**Markuu tixgeliyey:** Baahida loo qabo wax-ka bedelka iyo kaabista sharcigan.

**<u>Wuxuu soo saaray</u>**

**Sharciga soo socda:**

**Qodobka 1aad**

Golaha Wakiiladu waxay ansixiyeen Sharciga Wax-ka-Bedelka Dhismaha Bankiga Dowladda Puntland

**Qodobka 2aad**

Nuqulada asalka ah (Original) waxaa lagu kala kaydinayaa Xafiiska Madaxweynaha, Xafiiska Xoghayaha Guud ee Baarlamaanka iyo Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dowladda

**Qodobka 3aad**

Dhaqangal Sharcigani wuxuu noqonayaa markuu Madaxweynuhu saxiixo laguna soo saaro faafinta rasmiga ah ee Dowladda Puntland

**Siciid Cabdullaahi Deni**
Madaxweynaha Dawladda Puntland

Tell: +252-090-7797147; E-mail: dg.oop@plstate.so, oop@plstate.so; Website: www.plstate.so

**DAWLADDA PUNTLAND**
**EE SOOMAALIYA**
**GOLAHA WAKIILLADA**

**ولاية بو نت لاند الصومال**
**مجلس النواب**

**Xafiiska Guddoomiyaha**
**Office of the Speaker**

**Tix:-XGGW/DPL/50/2023** **Garoowe, Khamiis** **Taariikh:- 10/08/2023**

**Ku:- Madaxweynaha DPL** **Garoowe**

**Ujeeddo: - Ansixinta Wax-ka-bedelka Xeerka Dhismaha Bankiga Dawladda Puntland**

**Mudane Madaxweyne,**

**GUDDOOMIYAHA GOLAHA WAKIILLADU: -**

**MARKUU ARKAY:-** Dastuurka Dawladda Puntland Qodobkiisa **64**-**aad**

**MARKUU ARKAY:-** Soo gudbinta Madaxweynaha Ref: MW/DPS/106/2023 ee July 03, 2023, kuna saabsan wax-ka-bedelka Bankiga Dawladda Puntland.

**MARKUU TIX-GELIYEY: -** Baahida loo qabo Wax-ka-bedelka Iyo Kaabista Xeerka Aasaasiga ah ee Bankiga Dawladda Puntland.

**MARKUU DHEGEYSTEY: -** Dooddii iyo Go'aankii Golaha Wakiilladu kalfadhiga 52-aad, Fadhigiisii 15-aad ee 24.07.2023 cod gacanta tag ah ku Ansixiyeen wax-ka-bedelka Xeerka Bankiga Dawladda Puntland. Guntanka fadhiga oo ahaa (**52**) Mudane, waxaa ugu codeeyey oggol (**49**) Mudane, Diidmo majirin, halka ay ka aamuseen (**3**) Mudane.

**WUXUU GUDDOOMIYEY:-**

**Ansixinta Wax-ka-bedelka Xeerka Dhismaha Bankiga Dawladda Puntland.**

**Wada Shaqeyn Wacan**

**Md. Cabdirashiid Yuusuf Jibriil**
**Guddoomiyaha Golaha Wakiillada DPL.**

**DAWLADDA PUNTLAND EE SOOMAALIYA**

**GOLAHA WAKIILLADA PUNTLAND**

# WAX KA BEDELKA XEERKA DHISMAHA BANKIGA DAWLADDA PUNTLAND

**Luuliyo, 2023**

**GAROOWE, PUNTLAND, SOOMAALIYA**

## Tusmo Bogga


CUTUBKA 1-AAD .......... 5
Qodobka 1-aad .......... 5
Erey Bixin .......... 5
Qodobka 2-aad .......... 6
Magaca Xeerka .......... 6
Qodobka 3-aad .......... 6
Ujeeddooyinka Bankiga .......... 6
Qodobka 4-aad .......... 6
Shaqsiyadda Qaanuuneed ee Bankiga .......... 6
Qodobka 5-aad .......... 7
Xarunta Dhexe ee Bankiga .......... 7
Qodobka 6-aad .......... 7
Raasumaalka Bankiga .......... 7
Qodobka 7-aad .......... 7
Sanduuqa Keydka Khasabka Ah .......... 7
CUTUBKA 2-AAD .......... 7
Qodobka 8-aad .......... 7
Awoodaha iyo Waajibaadka Bankiga .......... 7
CUTUBKA 3-AAD .......... 9
Qodobka 9-aad .......... 9
Qaab-dhismeedka Bankiga .......... 9
Qodobka 10-aad .......... 9
Magacaabista Guddiga Agaasinka Bankiga iyo Maamulka Bankiga .......... 9
Qodobka 11-aad .......... 9
Shuruudaha Magacaabista Guddoomiyaha Bankiga iyo ku xigeennadiisa .......... 9
Qodobka 12-aad .......... 10
Shuruudaha Magacaabista Agaasimaha Guud ee Bankiga iyo ku-xigeenkiisa. .......... 10
Qodobka 13-aad .......... 10
Xasaanadda Xubnaha Maamulka Bankiga .......... 10
Qodobka 14-aad .......... 10
Qaybaha iyo Heerarka Shaqaalaha Bankiga .......... 10


GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR
المحامي العام للدولة

CUTUBKA 4-AAD ........ 11
Qodobka 15-aad ........ 11
Xilka iyo Waajibaadka Guddiga Agaasinka Bankiga ........ 11
Qodobka 16-aad ........ 11
Kulamadda Guddiga ........ 11
Qodobka 17-aad ........ 11
Gunnooyinka Guddiga ........ 11
Qodobka 18-aad ........ 12
Xilka iyo Waajibaadka Guddoomiyaha Bankiga ........ 12
Qodobka 19-aad ........ 12
Xilka iyo waajibaadka Guddoomiye Ku-xigeenka ........ 12
Qodobka 20-aad ........ 12
Xilka iyo Waajibaadka Agaasimaha Guud ........ 12
Qodobka 21-aad ........ 13
Agaasime Guud Ku-Xigeenka ........ 13
Qodobka 22-aad ........ 13
Waxyaabaha Ka Reebban Maamulka Sare ........ 13
Qodobka 23-aad ........ 14
Mushaarooyinka iyo Gunnooyinka Maamulka Sare ........ 14
Qodobka 24-aad ........ 14
Magaacaabista Xilalka Shaqaalaha ........ 14
Qodobka 25-aad ........ 14
Agaasimeyaasha Qaybaha iyo Maamuleyaasha Laamaha ........ 14
Qodobka 26-aad ........ 14
Xuquuqda Shaqaalaha ........ 14
Qodobka 27-aad ........ 14
Waajibaadka Shaqaalaha ........ 14
CUTUBKA 5-AAD ........ 15
Qodobka 28-aad ........ 15
Amaahsiinta Bankiga ee Hay'adaha Dawladda Puntland ........ 15
Qodobka 29-aad ........ 15
Adeegyada Kale ee Bankiga ........ 15

GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR
المحامي العام للدولة

Qodobka 30-aad ........ 16
Xiriirka Bankiga iyo Bankiga Dhexe ee Soomaaliya ........ 16
Qodobka 31-aad ........ 16
Hantidhowrka Gudaha iyo Hantidhowreyaasha ........ 16
Dibadeed ........ 16
Qodobka 32-aad ........ 16
Faa'iidada Bankiga ........ 16
Qodobka 33-aad ........ 16
Sanad-maaliyadeedka Bankiga ........ 16
Qodobka 34-aad ........ 17
Xisaab-xirka Sanadka ee Bankiga ........ 17
Qodobka 35-aad ........ 17
Faafinta Warbixin Dhaqaale ........ 17
Qodobka 36-aad ........ 17
Xeer-nidaamiye ........ 17
Qodobka 37-aad ........ 17
Burin ........ 17
Qodobka 38-aad ........ 17
Dhaqangal ........ 17

GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR
المحامي العام للدولة

## CUTUBKA 1-AAD

## Qodobka 1-aad
## Erey Bixin

Haddii aan Xeerkan dhexdiisa si kale loogu sheegin, ereyada soo socda waxaa loola jeeda macnaha ku hor qoran:-

| No | Ereyga | Macnaha |
|---|---|---|
| 1 | **Dawlad** | Waxaa loola jeedaa Dawladda Puntland ee Soomaaliya |
| 2 | **Dastuur** | Waxaa loola jeedaa Dastuurka Dawladda Puntland |
| 3 | **Madaxweyne** | Waxaa loola jeedaa Madaxweynaha Dawladda Puntland |
| 4 | **Golaha** | Waxaa loola jeedaa Golaha Wakiillada Dawladda Puntland |
| 5 | **Xukuumad** | Waxaa loola jeedaa Golaha Xukuumadda Dawladda Puntland |
| 6 | **Bangi** | Waxaa loola jeedaa Bankiga Dawladda Puntland |
| 7 | **Wasiir** | Waxaa loola jeedaa Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda Dawladda Puntland |
| 8 | **Guddi Maamul "Board"** | Waxaa loola jeedaa Guddiga Maamulka ee Bankiga ee ku xusan Qodobka 111-aad ee Dastuurka Dawladda Puntland |
| 9 | **Guddoomiye** | Waxaa loola jeedaa Guddoomiyaha Bankiga Dawladda Puntland |
| 10 | **Guddoomiye ku-xigeen** | Waxaa loola jeedaa Guddoomiye xigeenka Bankiga Dawladda Puntland |
| 11 | **Agaasime Guud** | Waxaa loola jeedaa Agaasimaha Guud ee Bankiga Dawladda Puntland |
| 12 | **Agaasime Guud xigeen** | Waxaa loola jeedaa Agaasime Guud xigeenka Bankiga Dawladda Puntland |
| 13 | **Xeer** | Waxaa loola jeedaa Xeerka Dhismaha Bankiga Dawladda Puntland |
| 14 | **Hay'ad Maaliyadeed** | Waxaa loola jeedaa Hay'ad si sharci ah uga diiwaangashan Puntland, qabata amase bixisa adeegyo maaliyadeed sida, lacag qabasho, lacag diris, amaah bixin iyo maalgelin |
| 15 | **Lacag-dhiqista iyo Maalgelinta Argagaxisada** | Waxaa loola jeedaa, lahaanshaha, haysashada, beddelaadda amase wareejinta nooc kasta oo hanti ah, ayna ka mid tahay lacag, iyadoo la ogsoonyahay in ay ka soo jeeddo faldembiyeed, ujeeddada laga leeyahayna ay tahay in la qariyo ama la maldaho asalkeedii hore oo sharcidarro ahaa, amase in lagu taageero qof ku hawlan inuu faldembiyeed geysto, si uu uga baxsado cawaaqibka falalka sharcidarrada ah oo ay geystaan. |

GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR
المحامي العام للدولة

| | | |
|---|---|---|
| 16 | **Raasumaalka Bankiga** | Waxaa loola jeedaa, hantida joogtada ah ee Bankiga loo gaaryeeley |
| 17 | **Maamulka Bankiga** | Waxaa loola jeedaa Guddoomiyaha, Guddoomiye ku xigeenka, Agaasimaha Guud iyo Agaasime ku xigeenka sida ku cad Qodobka 9-aad Farqadiisa 2-aad ee Xeerkan |

## Qodobka 2-aad
## Magaca Xeerka

Xeerkan waxaa lagu magacaabaa Xeerka Dhismaha Bankiga Dawladda Puntland.

## Qodobka 3-aad
## Ujeeddooyinka Bankiga

Ujeeddooyinka ugu waaweyn ee Bankigu ka fulinayo geyiga Dawladda Puntland waxaa ka mid ah:-

1) La-socodka lacagaha ay dadku ku keydsadaan Hay'adaha Maaliyadda iyo amaahda ay Hay'adahaas bixiyaan saameynta ay ku leeyihiin dhaqaalaha.

2) In uu dhiirrigeliyo, maamulo, ilaaliyana nidaam lacageed iyo maaliyadeed oo deggan, kuna dhisan tartanka suuqa xorta ah.

3) In uu taageero siyaasadaha dhaqaale ee Xukuumadda, si uu kaalin wax-ku-ool ah uga qaaato horumarinta arrimaha dhaqaalaha iyo maaliyadda ee Dawladda Puntland.

4) Ka-hortagga lacagaha la dhaqo iyo maalgelinta argagaxisada.

## Qodobka 4-aad
## Shaqsiyadda Qaanuuneed ee Bankiga

Bankigu waa Hay'ad Dawladeed, madaxbannaan, maaliyadeeed, joogto ah, leh shaqsiyad qaanuuni ah oo ku dhisan qaanuunka guud, sida uu qeexayo Qodobka 111-aad ee Dastuurka Dawladda Puntland, awoodna u leh in uu heli karo, yeelan karo, haysan karo, kuna tasarrufi karo hanti, heshiis gali karo, magaciisa wax ku dacweyn karo, laguna dacweyn karo, wuxuuna sii ahaanayaa Bankiga Dawladda Puntland.

GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR
المحامي العام للدولة

## Qodobka 5-aad
## Xarunta Dhexe ee Bankiga

1. Xarunta Dhexe ee Bankigu waa caasimadda Puntland ee Garoowe, wuxuuna laamo ka furan karaa Gobollada Puntland oo dhan iyo deegaanno kale oo ka tirsan Soomaaliya.
2. Xarunta Dhexe ee Bankiga waxaa si ku meel gaar ah loogu rari karaa meel kasta oo Puntland ka mid ah, haddii ay dhacaan xaalado degdeg ah.

## Qodobka 6-aad
## Raasumaalka Bankiga

1. Raasumaalka Maaliyadeed ee Bankigu waa US$2,500,000 (Laba malyan iyo Shan boqol Kun Doollar) oo ay bixineyso Dawladda Puntland, waana la kordhin karaa ka dib talo soo jeedinta Guddiga Agaasinka.

2. Raasumaalka Bankigu wuxuu kaloo ka kooban yahay hanti ma-guurto ah, mid guurto ah iyo mid uu ku heli karo deeq loo fidiyay awgeed.

3. Dhammaan hantidii hore ee ay lahaayeen Bangiyadii Soomaaliyeed ee ku yaal Puntland waxay qayb ka noqonayaa hantida Bankiga.

## Qodobka 7-aad
## Sanduuqa Keydka Khasabka Ah

1. Bankigu wuxuu yeelanayaa Sanduuqa Keydka Khasabka ah oo dhan US $2,500,000 (Laba Malyan iyo Shan boqol kun oo Doollar).
2. Sanduuqa Keydka Khasabka waxaa loo isticmaalayaa si looga hortago kolka uu qiime dhac lacageed yimaado amase khasaarooyin kale oo aan lagu talo galin oo Bankiga soo foodsaara.

## CUTUBKA 2-AAD
## Qodobka 8-aad
## Awoodaha iyo Waajibaadka Bankiga

Awoodaha iyo Waajibaadka Bankiga Dawladda Puntland waxaa ka mid ah:-

1) In uu yahay Bankiga iyo Wakiilka Maaliyadeed oo qura ee Dawladda Puntland.

2) In uu fuliyo dhammaan adeegyada Bankiga Dawladda Puntland ee heer Dawladda Puntland.

3) In uu u fududeeyo dhammaan Wasaaradaha iyo Hay'adaha Dawladda Puntland in ay Xisaabo socda ka furtaan Bankiga oo qura, lacagahoodana dhigtaan.

4) Lacagaha ay Hay'adaha Dawladda Puntland ku furanayaan xisaabaha ay Bankiga la leeyihiin waxay noqonayaan Shilin Soomaali amase lacago qalaad oo sarrifma sida, Doollarka Mareykanka (US Dollar) amase Euro.

5) Adeegyada kale oo uu Bankigu u fuliyo Hay'adaha Dawladda Puntland waxaa ka mid ah:-

   **b)** Lacag-diris dalka gudihiisa iyo dibeddiisaba ah, ha ahaato mid lagu fulinayo heshiisyo ay Dawladda Puntland gashay amase adeegyo loo qabanayo Hay'ado macaamiil la ah Bankiga.

   **t)** Hormarisyo amaaheed oo loo fidin karo Wasaaradda Maaliyadda, soo-celinta hormarisyadaasna laga bixinayo dakhliga ka soo xerooda miisaaniyad-sanadeedka isla sanadkaas uu ansixiyey Golaha Wakiillada Dawladda Puntland.

   **j)** Sidoo kale, wuxuu hormarisyo amaaheed u fidin karaa Hay'adaha Dawladda Puntland oo dakhligooda ku soo xeroodo Bankiga, iyadoo la waafajinayo xeerka u degsan Bankiga .

6) Bixinta, diidmada, cusbooneysiinta, kalanoqoshada shatiyada iyo kormeerka Hay'adaha Maaliyadeed ee ku sugan geyiga Dawladda Puntland, sida Bangiyada, Shirkadaha Xawaaladaha, Shirkadaha Caymiska iyo hay'adaha adeegyada lacageed ku fuliya teleefoonnada mobileka ah iyo aalado kale.

7) In uu amaah yar yar u fidin karo ganacsiyada yar yar, si sare loogu qaado horumarka dhaqaalaha, shaqo-yarida loo yareeyo, heerka nolosha ee dadkana sare loogu qaado.

8) Bankigu wuxuu maamulka iyo bixinta amaaha yar yar u wakiilan karaa Bankiyada ganacsiga ee ka hawlgala Dawladda Puntland, iyadoo lagu maamulayo nidaamka amaahsiinta ee waafaqsan Shareecada Islaamka.

9) In la sii hormariyo aaladaha uu Bankigu u isticmaalo nidaamka keydinta iyo lacag bixinta uu haatan isticmaalo iyo habraacyada iyo xeerarka maaliyadeed ee uu kula dhaqmo macaamiisha ku xiran nidaamkaas.

10) Soo-saaridda aalado amaaheed, sida Jeegagga Xisaabaha socda, Jeegagga Wareega iyo Jeegagga lacagta Qalaad ee Dibedda.

11) Bankigu wuxuu ballanqaadayaa, mas'uulna ka yahay in uu oofiyo bixinta qiimaha lacageed ee Jeegagga Wareega iyo Jeegagga Lacagta Qalaad ee Dibedda, maadaama qiime lacageed oo u dhigma looga beddeshay.

12) Bankigu wuxuu soo saari karaa Xeer-nidaamiyaal, habraacyo ama wareegtooyin waafaqsan Dastuurka iyo xeerarka dalka si uu u hirgeliyo habsami u socodka hawlaha Bankiga loo igmaday.

GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR
المحامي العام للدولة

# CUTUBKA 3-AAD
## Qodobka 9-aad
## Qaab-dhismeedka Bankiga

Qaab-dhismeedka Bankiga wuxuu ka koobanyahay sidan:-

1. Bankiga dhexe waxaa hawlihiisa haga guddi maamul (Board) oo ka kooban 7-xubnood oo kala ah;
   b. Guddoomiyaha Bankiga dhexe
   t. Agaasimaha guud ee Wasaaradda Maaliyadda
   j. Agaasimaha Guud ee Wasaarada Ganacsiga
   x. Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Shaqada iyo Shaqaalaha
   kh. Sadex xubnood oo ay magcowdo rugta Ganacsiga
   D. Xoghaye oo aan cod lahayn oo noqonaya Agaasimaha guud ee Bankiga dhexe

2. Maamulka Bankiga oo ka kooban:-
   b) Guddoomiyaha Bankiga.
   t) Guddoomiye xigeenka Bankiga.
   j) Agaasime Guud ee Bankiga.
   x) Agaasime Guud xigeenka Bankiga.

## Qodobka 10-aad
## Magacaabista Guddiga Maamulka "Board" Bankiga iyo Maamulka Bankiga

1. Guddiga Maamulka Bankiga "Board" ee ku xusan farqada 1-aad ee qodobka 9-aad waxaa wareegto ku soo saaraya Madaxwaynaha 6 bilood gudohood, marka xeerkani dhaqangalo.
2. Guddoomiyaha Bankiga waxaa magacaabaya xukuummadda, iyada ayaana sababaha sharcigu tilmaamayo oo keliya ku ruqseyn karta, Golaha Wakiillada ayaa ansixiya magacaabistiisa iyo ruqseyntiisaba, sida ku cad qodobka 111-aad farqadiisa 3-aad ee Dastuurka.
3. Guddoomiye xigeenka, Agaasimaha Guud iyo Agaasime xigeenka Bankiga waxaa magacaabaya Madaxweynaha Dawladda Puntland

## Qodobka 11-aad
## Shuruudaha Magacaabista Guddoomiyaha Bankiga iyo ku xigeenkiisa

Qof kasta oo loo dooranayo Guddoomiyaha ama ku-xigeenkiisa waa in uu buuxiyaa shuruudaha soo socda:-

1. Waa in uu yahay Soomaali, Muslim ah.

GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR
المحامي العام للدولة

2. Waa in aanay da'adiisu ka yarayn 30 sano.
3. Waa in aan xuquuqdiisa muwaadinnimo la laalin Shantii (5) sano ee ugu dambaysey.
4. Waa in uu haystaa shahaadada heerka koowaad ee Jaamacadda.
5. Waa in uu leeyahay waayo aragnimo aan ka yarayn Shan (5) sano oo la xiriirta shaqadiisa.

## Qodobka 12-aad
## Shuruudaha Magacaabista Agaasimaha Guud ee Bankiga iyo ku-xigeenkiisa.

Qofka loo magacaabayo Agaasimaha Guud Bankiga iyo ku xigeenkiisa waa in uu buuxiyaa shuruudaha hoos ku xusan:-

1. Waa in uu yahay Muwaadin soomaali, Muslim ah, guta waajibaadkiisa diiniga ah, xil-kas ah, garaadkiisu dhan yahay, da'diisuna aanay ka yarayn labaatan iyo Shan (25) sano.
2. Waa in uu leeyahay waxbarasho heer jaamacadeed oo xiriir la leh shaqadiisa.
3. Waa in uu leeyahay waaya aragnimo la xiriirta maamulka, maareynta iyo horumarinta Bangiyada.
4. Waa in uu magac iyo sumcad wanaagsan ku dhex leeyahay bulshada

## Qodobka 13-aad
## Xasaanadda Xubnaha Maamulka Bankiga

Guddoomiyaha Bankiga oo kaliya ayaa leh Xasaanad waxaana loo raacayaa qodobka 131-aad farqadiisa 4-aad ee Dastuurka.

## Qodobka 14-aad
## Qaybaha iyo Heerarka Shaqaalaha Bankiga

Qaybaha iyo Heerarka shaqaalaha Bankiga wuxuu ka koobanyahay sida soo socota, iyadoo faahfaahinta darajooyinka iyo jagooyinka uu Bankigu ku soo saarayo Xeer-nidaamiye isaga u gaar ah:-

B. Saraakiil Sare.
T. Saraakiil.
J. Shaqaale Fuliyeyaal ah.
X. Shaqaale Gargaareyaal ah.
KH. Farsamo-yaqaanno.

## CUTUBKA 4-AAD

## Qodobka 15-aad
## Xilka iyo Waajibaadka Guddiga Maamulka Bankiga "Board"

Guddiga Maamulka Bankiga "Board" waa unuga ugu sarreeya hagida hawlaha Bankiga waxayna leeyihiin awoodaha iyo waajibaadkan hoose:-

1. Talo jeedinta iyo ansixinta siyaasadaha lacageed iyo maaliyadeed ee ku habboon Bankiga.
2. Talo ka bixinta sida hawlaha Bankigu u socdaan.
3. Ansixinta miisaaniyadda sanadlaha ah ee Bankiga
4. Samaynta Kormeerada, baaritaanka, ganaaxid Bangiyada iyo Hay'adaha kale ee Maaliyadda ee ku sugan geyiga Dawladda Puntland, haddii ay ku xadgudbaan Xeerarka iyo nidaamka maaliyadeed ee u degsan Dawladda Puntland.
5. Oggolaanshaha ama diidmada dallacaadaha derajo dhimista, shaqaale qorista, ruqsaynta iyo anshaxmarinta shaqaalaha.
6. Go'aaminta noocyada hantida Bankiga oo noqoneysa keydka lacagta dibadeed.
7. Go'aaminta noocyada hantida Bankigu leeyahay ee ku habboon in maalgelin lagu sameeyo.

## Qodobka 16-aad
## Kulamadda Guddiga


1. Guddigu wuxuu yeelanayaa labo (2) kulan sanadkii, lixdii (6) biloodba mar.
2. Fadhiyada guddigu waxay ku furmayaan hal dheeri tirada xubnaha guddiga ama ugu yaraan 4 xubnood.
3. Guddoomiyaha Bankiga ayaa dalbi kara kulamo dheeraad ah, waxayna ku ansxayaan hal dheeri tirada xubnaha guddiga.
4. Doodaha Guddiga waxaa lagu kala baxayaa hal dheeri tirada fadhiga.

## Qodobka 17-aad
## Gunnooyinka Guddiga

1. Xubnaha Guddiga Agaasinka Bankiga waxay xaq u yeelanayaan gunnooyin labada (2) kulan oo sanad walba ay kulmaan.

2. Go'aanka Maamulka Bankiga ayaa lagu dhaqayaa gunnooyinka ay muteysanayaan Xubnaha Guddiga.





## Qodobka 18-aad
## Xilka iyo Waajibaadka Guddoomiyaha Bankiga

Guddoomiyuhu wuxuu mas'uul uga yahay Bankiga hawlaha soo socda:

1. In uu yahay Sarkaalka ugu sarreeya qaab-dhismeedka Maamulka Sare ee Bankiga, hawshiisuna waa mid si joogto ah xilli buuxa lagu fuliyo.
2. In uu qaanuun ahaan ku metalo Bankiga gudaha iyo dibedda iyo in dacwadaha Bankigu qayb ka yahay u wakiilan karo qareen ka difaaca Maxkamadda horteeda.
3. La-socodka warbixin-sanadeedka, warbixinta siyaasadda lacagta iyo warbixinnada kale ee rasmiga ah ee Bankigu soo saaro.
4. Wax-ka-saxiixidda heshiisyada iyo qandaraasyada maaliyadeed oo Bankigu faafiyo.
5. Ka qaybgalka Shirka Golaha Wasiirrada ee Dawladda Puntland ee looga hadlayo arrimaha dhaqaalaha iyo maaliyadda ee Dawladda Puntland.
6. La-socodka miisaaniyad-sanadeedka iyo xisaab-xirrada Bankigu soo saaro.
7. Wuxuu guddoomiyaa shirarka iyo kulamadda Golaha Agaasinka Bankiga iyo Maamulka Bankiga.
8. Wuxuu saxiixaa go'aamada Golaha Agaasinka Bankiga iyo Maamulka Bankiga.
9. Wuxuu Guddiga Golaha Agaasinka Bankiga u soo jeediyaa kordhinta raasumaalka Bankiga.
10. Magacaabista shaqaalaha aan rasmiga ahayn ee Bankiga haddii loo baahdo si loogu gudbiyo Golaha Agaasinka Bankiga ansixintooda.

## Qodobka 19-aad
## Xilka iyo waajibaadka Guddoomiye Ku-xigeenka

Guddoomiye Ku-xigeenka wuxuu mas'uul uga yahay Bankiga hawlaha soo socda:-

1) Waa Sarkaalka sida tooska ah ugu xiga Guddoomiyaha Bankiga, hawshiisuna waa mid joogto ah, xilli buuxana lagu fuliyo.

2) Wuxuu si gaar ah u fuliyaa hawlaha shaqo oo uu Guddoomiyuhu u xilsaaro.

3) Wuxuu kala taliyaa Guddoomiyaha howlaha shaqo ee Bankiga.

4) Wuxuu matalaa guddoomiyaha marka uu maqanyahay ama uusan shaqada gudan karin sabab kasta ha ku timaadee.

## Qodobka 20-aad
## Xilka iyo Waajibaadka Agaasimaha Guud

Agaasimaha Guud ee Bankiga wuxuu mas'uul uga yahay Bankiga hawlaha soo socda:

GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR

1. Fulinta siyaasadda maaliyadeed oo uu Bankigu ku soconayo, ayna soo ansixiyeen Guddiga.
2. Socodsiinta, bixinta awaamirta iyo kormeerka hawl-maalmeedka shaqooyinka maamulka iyo lacagta, hawshiisuna waa mid joogto ah, xilli buuxana lagu fuliyo.
3. Bixinta, Cusbooneysiinta, diidmada, kala noqoshada shatiyada ay ku shaqeeyaan Bangiyada iyo Hay'adaha kale ee Maaliyadeed oo ka hawlgala geyiga Dawladda Puntland.
4. Fulinta iyo la-socodka qorshe hawleedka loo dejiyey Bankiga.
5. Qiimeynta tayada waxqabadka shaqada.
6. Soo jeedinta dallacaadaha iyo tallaabooyinka anshaxmarinta shaqaalaha.
7. Soo saarista awaamir qoraal ah iyo kuwo afeed oo lagu socodsiinayo hawlaha Bankiga.
8. Wuxuu kaaliyaa Guddiga Agaasinka Bankiga.
9. Wuxuu fuliyaa amarrada hawl socodsiinta ee ka soo baxaya Guddoomiyaha iyo Guddoomiye kuxigeenka.

## Qodobka 21-aad
## Agaasime Guud Ku-Xigeenka

Agaasime Guud Ku-Xigeenka Bankiga wuxuu mas'uul uga yahay Bankiga hawlaha soo socda:

1) Dhammaan hawlaha uu u xilsaaro Agaasimaha Guud ee Bankiga.
2) Fulinta iyo la-socodka awaamirta shaqo ee uu bixiyo Agaasimaha Guud ee Bankiga.
3) Wuxuu metalaa Agaasimaha marka uu maqanyahay ama uusan shaqada gudan karin sabab kasta ha ku timaadee, hawshiisuna waa mid si joogto ah xilli buuxa lagu fuliyo.

## Qodobka 22-aad
## Waxyaabaha Ka Reebban Maamulka Sare

Xubnaha ka tirsan Maamulka Sare ee Bankiga waxaa ka reebban arrimaha soo socda:

1) In ay iyagoo xil u haya Bankiga ay isla markaasna Xubno ka noqdaan Golaha Wakiillada Dawladda Puntland amase Golaha Wasiirrada.
2) In ay ka oggolaadaan Hay'adaha kale ee Maaliyadda oo hoos yimaada Sharciga Bankiga in ay u qabtaan mas'uuliyad shaqo mid joogto amase aan joogto aheyn.
3) In ay musallifaan oo ay bixin waayaan deyman lagu yeeshay amase u fududeeyaan macaaamiisha Bankiga hawlo ka hor-imaanaya Sharciga.

GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND STATE GENERAL SOLICITOR

4) Xubnaha Maamulka Sare ee Bankiga waxay luminayaan mas'uuliyadaha ay u hayaan Bankiga haddii ay ku tallaabsadaan arrimahaas kor ku xusan midkood amase dhammaantood.

## Qodobka 23-aad
## Mushaharooyinka iyo Gunnooyinka Maamulka Sare

1. Golaha Agaasinka Bankiga ayaa go'aaminaya mushaharooyinka iyo Gunnooyinka xubnaha Maamulka Bankiga, iyadoo loo tixgelinayo mas'uuliyadaha maamul iyo maaliyadeed ay u hayaan Bankiga.
2. Gunnooyinka ay Xubnaha Maamulka Sare ee Bankiga xaqa u yeelanayaan waxaa kaloo ka mid ah dheefo gaar ah ee xagga caafimaadka iyo guriyeynta.

## Qodobka 24-aad
## Magaacaabista Xilalka Shaqaalaha

Bankigu wuxuu yeelanayaa Agaasimeyaal Qaybeed iyo Maamuleyaal Laamood oo uu soo magacaabo Guddoomiyaha Bankigu, kadib markuu soo jeediyo Agaasimaha Guud

## Qodobka 25-aad
## Agaasimeyaasha Qaybaha iyo Maamuleyaasha Laamaha

Hawlaha iyo tirada Agaasimeyaasha Qaybaha Bankiga iyo Maamuleyaasha Laamaha waxaa lagu qeexi doonaa Xeernidaamiye amase Wareegto ay isla oggolaadeen Guddoomiyaha iyo Agaasimaha Guud ee Bankiga.

## Qodobka 26-aad
## Xuquuqda Shaqaalaha

1. Shaqaalaha Bankiga waxay xaq u leeyihiin in si caddaalad ah loo maamulo, ay helaan xuquuqahooda uu Sharcigu u oggolyahay, ayna ku shaqeeyaan jawi u suurtagalinaya in ay si habsami ah u gutaan waajibaadkooda shaqo ee loo igmaday.
2. Xuquuqda iyo Waajibaadka shaqaalaha Bankiga waxaa lagu maamulayaa Xeer gaar ah oo Golaha Wakiiladdu ansixiyo

## Qodobka 27-aad
## Waajibaadka Shaqaalaha

Shaqaalaha Bankiga waxaa waajib ku ah in ay oofiyaan arrimaha soo socda:

1. Daacadnnimo iyo oofinta shuruudaha heshiiska shaqo oo ay la galeen Bankiga.

GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA STATE GENERAL SOLICITOR PUNTLAND

2. Ilaalinta sumcadda wanaagsan ee Bankiga.
3. U-hoggaansanaanta awaamirta shaqo oo ay siiyaan madaxda Bankiga.
4. In danta guud ee dalka laga hormariyo midda gaar ahaaneed.
5. Ilaalinta iyo xajinta xogta Bankiga, ha ahaato mid la xiriirta macaamiisha Bankiga uu xiriirka shaqo la leeyahay, Dawladda Puntland ama mid la xiriirta maamulka gudaha ee Bankiga amase cid kasta oo kale oo uu Bankigu xiriir shaqo la leeyahay, Waa waajib saaran qof kasta oo shaqaalaha ka mid ah oo xogtaas ay soo gaarto inuu ka ilaaliyo halista in la xado, ay lunto ama si gurracan loo faafiyo amase loo addeegsado.
6. Xubnaha ka tirsan shaqaalaha ama kuwa katagay, haddii aan Maxkamadd ka dalban markhaati kama furi karaan arrimaha la xiriira shaqooyinka Bankiga oo ay goobjoog amase xog-ogaal u soo ahaayeen awgeed, iyagoon Guddoomiyaha amase Agaasimaha Guud oggolaasho ka haysan.
7. Ciddii ku xadgudubta awaamirta uu Qodobkani qeexayo waxay muteysan kartaa in shaqada laga ruqseeyo.

## CUTUBKA 5-AAD
## Qodobka 28-aad
## Amaahsiinta Bankiga ee Hay'adaha Dawladda Puntland

Amaahda uu Bankigu u fidiyo Hay'adaha Dawladda Puntland waxaa loo nidaaminayaa sidatan soo socota:-

1) Bankigu wuxuu amaah u fidin karaa Hay'adaha Dawladda Puntland ee dakhliga joogtada ah soo galo, haddii uu u arko iney macquul tahay.

2) Bankigu amaahda uu siiyo Hay'daha Dawladda Puntland wuxuu ka qaadayaa adeegyo khidmo oo waafaqsan Shareecada Islaamka.

3) Guud ahaan amaahda uu Bankigu bixiyo marnaba kama badnaan karto boqolkiiba laabaatan (20%) qiimaha lacageed ee raasumaalkiisa.

4) Amaahda loo fidiyo Hay'adahaas Dawladda Puntland waxaa lagu bixinayaa ugu badnaan saddex (3) hafto, waxaana lagu soo celinayaa ugu badnaan saddex (3) bilood.

## Qodobka 29-aad
## Adeegyada Kale ee Bankiga

Bankigu wuxuu Hay'adaha Dawladda iyo bulshada u fulin karaa adeegyo dhinacyada ganacsiga, maalgelinta iyo horumarinta.

## Qodobka 30-aad
## Xiriirka Bankiga iyo Bankiga Dhexe ee Soomaaliya

Bankigu wuxuu xiriir iskaashi iyo wada-shaqeyn wacan uu mar walba la yeelanayaa Bankiga Dhexe ee Soomaaliya si waafaqsan ujeeddooyinka iyo hawlaha labada Banki loo igmaday.

## Qodobka 31-aad
## Hantidhowrka Gudaha iyo Hantidhowreyaasha Dibadeed

1. Xisaabaadka Bankiga Dawladda Puntland waxaa baari kara Hantidhowre Gudaha oo ka tirsan shaqaalaha joogtada ah ee Bankiga. Bankigu wuxuu awood u leeyahay in uu u yeerto Hantidhowreyaal Dibadeed oo warbixin ka diyaariya xaaladda xisaabihiisa haddii uu u baahdo.
2. Hanti-dhowrka Gudaha ama mid midabadeedba ee Bankigu kama hor istaagayo waajibaadka shaqo ee Hantidhowrka Guud ee Puntland ka fulinayo Bankiga si waafaqsan Dastuurka.

## Qodobka 32-aad
## Faa'iidada Bankiga

Faa'iido-sanadeedka saafiga ah ee Bankiga waxaa loo kala qaybinayaa sida soo socota:-

1) Boqolkiiba Labaatan iyo shan (25%) lagu wareejinaa Xisaabta Keydka Khasabka ah oo ka furan Bankiga ilaa iyo inta laga gaarsiinayo US$ 2,500,000 (labo malyan Shan boqol Kun Doollar).
2) Boqolkiiba Konton (50%) waxaa lagu bixinayaa kharashyada socda ee Bankiga.
3) Boqolkiiba labaatan iyo shan (25%) waxaa lagu keydinayaa Xisaabta Keydka ee Bankiga.
4) Haddiise uu Bankigu faa'iido soo saari waayo dhammaadka sanadka, waxaa kabaya Dawladda Puntland oo bixineysa kala bar (50%) faa'iidadii saafiga aheyd ee sanadkii ugu dambeeyay Bankigu soo saaray.
5) Khidmadda Bankigu ku fulinayo hawlihiisa shaqo waa 4% oo ka imanaysa dhakhliga dawladda ee Bankigu qabto.

## Qodobka 33-aad
## Sanad-maaliyadeedka Bankiga

Sanad-maaliyadeedka Bankiga wuxuu ka bilaabmaa kowda Jannaayo, wuxuuna ku egyahay 31ka Diseembar. Xisaabaha Bankiga waxaa lagu xiraa dhammaadka sanad maaliyadeedkaas.

## Qodobka 34-aad
## Xisaab-xirka Sanadka ee Bankiga

Dhammaadka sanad walba Bankigu wuxuu soo saarayaa caddeymo muujinaya xisaab-xirkiisa faa'iido iyo khasaare, ayna soo xaqiijiyeen Baareyaal, warbixinnadaas oo dhan, waxaa loo gudbinayaa Xafiiska Xisaabiyaha Guud ee Dawladda, si ay qeyb uga noqdaan warbixinta Xisaab-xirka ee Sannadka Dhammaaday.

## Qodobka 35-aad
## Faafinta Warbixin Dhaqaale

Dhammaadka sanad-maaliyadeed kasta, Bankigu wuxuu soo saaraa warbixin dhaqaale oo muujineysa xaaladda dhaqaale ee sanadkaas la soo maray, gaar ahaan miisaaniyadda ganacsiga, wax-dhoofinta, wax-keenista, wax-soo-saarka, miisaaniyadda Dawladda Puntland, xaaladda ascaarta gudaha, dhaqdhaqaaqa xisaabaha hay'adaha maaliyadda iyo weliba xog tifatiran ee tirakoobyo arrimahaas caddeynaya.

## Qodobka 36-aad
## Xeer-nidaamiye

Bankigu wuxuu soo saari karaa, Xeer-hoosaad, Xeer-nidaamiye iyo wareegtooyin fulineed oo aan ka hor-imanayn Xeerkan, si loogu hirgeliyo hawlaha Xeerkan.

## Qodobka 37-aad
## Burin

Waxaa la buriyay Xeer, Xeernidaamiye iyo wareegto kastoo fulineed, oo aan la socon karin amase ka soo horjeedda Xeerkan.

## Qodobka 38-aad
## Dhaqangal

Xeerkani wuxuu dhaqangalayaa marka Golaha Wakiilladu ansixiyo, Madaxweynaha Dawladda Puntland saxiixo, laguna soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda Puntland.



GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR